# Talooyin loogu talagalay la macaamilka Booliska marka la Soo sheegayo Dembiga Nacaybka ama Eexda

Tixgelinta dhibbanayaasha iyo markhaatiyaasha marka la sameynayo warbixinta booliska.

Oregon Department of Justice's
CIVIL RIGHTS UNIT

# Khadka Ka Jawaabida Eexda ee Gobolka Oregon

**Khadka Ka Jawaabida Eexda**
**(khadka aan ahayn xaalada degdega ah)**
1-844-924-BIAS (2427)
Isniinta-Jimcaha, 9 subaxnimo-5galabnimo
Turjumaad ku qoran 240+ luqaddood
Waan Aqbalnaa Wicitaanada Gudbinta oo Dhan
Wakhti kasta ku soo sheeg dhanka internet-ka
StandAgainstHate.Oregon.gov

* Khadka telefoonka ayaa gacan ka geysan kara soo sheegida **dhammaan** dembiga nacaybka
* Ma aha in aad adiga naftaadu ogaato, xataa ka dib akhrinta boggagani

# Talooyin loogu talagalay la macaamilka Booliska

## Halkee iyo goortee ayaan soo sheegaa?

- U soo sheeg hay'ada booliska halka dembigu ka dhacay
  - Xataa haddii aad hadda ku sugan tahay gobol kale, waa in aad u soo sheegtaa waaxda booliska ee ku taala magaalada iyo gobolka halka uu dembigu ka dhacay
  - Waxaad ku soo sheegi kartaa telefoon ahaan
- In waqtigii loogu talagalay lagu soo sheego waa mid muhiim ah
  - Mararka qaarkood caddeynta (sida duubista muuqaalku) si dhaqso ah ayay u baxaan
  - Mararka qaarkood muddada sharcigu oggol yahay ayaa waqtigiisu dhacaa
- Ma jirto kala sareynta hay'ada boolisku
  - Haddii aadan jeclaysan jawaabta waaxda booliska magaalada halka dembigu ka dhacay, xafiiska mas'uulka, Booliska Gobolka Oregon, FBI, Oregon DOJ, iyo US DOJ ma aha madaxdooda
- Soo sheeg, marka, iyo halka aad kalsooni ku qabto

# Talooyin loogu talagalay la macaamilka Booliska

## Diyaarinta

- Codso in aad ku kulantaan meel iyo waqti aad adiga ku kalsoon tahay
  - Ma waxaad doorbidaysaa gurigaaga, dukaanka bunka, saldhiga booliska, kulan dhanka internet-ka ah?
- Codso turjubaan
  - Waxaa fiican in aad si cad u sheegto erayadaada oo aad si buuxda u fahamsan tahay
- Codso baahiyaha dhanka gelitaanka
  - “Waxaan qabaa naafanimo waxaanan codsanayaa qorshe la sii dejiyay oo macquul ah”
- Codso qof wax taageera oo aad ku kalsoon tahay in uu kula socdo
  - Waa in aad tahay 15 jir ama ka weyn
  - Qofka wax taageeraa waa in uu ahaadaa 18 jir ama ka weyn oo uusan ahayn markhaati

# Talooyin loogu talagalay la macaamilka Booliska

## Diyaarinta

- Qor liiska waxyaabaha aad rabto in aad ku darto warbixintaada
  - Taariikhaha
  - Waqtiyada
  - Luqad/dhaqan gaar ah
  - Tilmaamayaasha eexda
  - Markhaatiyaasha, oo ay ku jiraan cidda kale oo aad sheegtay
  - Dhacdooyinka hore
- Qor liiska su’aalaha aad hayso
- Xusuusno, ma aha in aad xalliso iyaga, ama xataa wax ka og tahay

# Talooyin loogu talagalay la macaamilka Booliska

## Diyaarinta

### Dib u eegis ku samee liiska tilmaamayaasha eexda

- ❑ **Kala duwanaanshaha**, ha ahaato mid dhab ah ama ha ahaato sida qofka la tuhunsanyahay u arko jinsiyada, midabka, qowmiyadda, jinsiga, aqoonsiga jinsi ahaaneed, dalka uu ka soo jeedo, diinta, dookha galmo, xaalada naafanimo, ama muujinta dhaqan ee kale qofka dhibbanaha ah.
- ❑ Qof ka dhibbanaha ahi wuxuu ka qayb qaatay **hawlo** kor loogu qaadayo ama loogu doodayo koox ama aqoonsi gaar ah.
- ❑ Dhacdadu waxay ku soo beegan tahay[ 2]fasax ama taariikh muhiimad gaarka ah u leh kooxda dhibbanaha ama qofka la tuhunsan yahay.
- ❑ Eex la xiriirta **luqad, hadalo qoraal ah ama tilmaamo** ayuu sameeyay qofka la tuhunsan yahay.
- ❑ Eex la xiriirta **sawirro, calaamado, astaamo, iyo sawirrada 'graffiti'** oo ku yaala dharka qofka la tuhunsan yahay, qof, ama hanti ayaa lagaga tagay goobta dhacdada.
- ❑ **Walxo, erayo, waxyaabo** ka turjumaya shaqada kooxo nacayb oo abaabulan ayaa laga tagay (tusaale, koofiyado cad, isku tallaabyo gubanaysa, xarkaha qoorta 'nooses', iwm.)
- ❑ Dembiyada eexda oo hore ayaa lagu kacay isla **goob** isku mid ah.
- ❑ Goobtu waxay u taagan tahay **meel barakaysan oo ammaan ah, u gaar ah, oo ay iskugu timaado** kooxdu.
- ❑ Qofka dhibbanaha ama markhaatiga(yaasha) **ayaa u arka** in dhacdada **ay ka dambeysay** eex.
- ❑ Qofka la tuhunsan yahay **ayaa hore ugu lug yeesahay** dhacdo la mid ah ama ah xubin ka tirsan/xiriir la leh **kooxo nacayb oo abaabulan**.
- ❑ Qofka la tuhunsan yahay ayaa si shakhsi ah ama dhanka internet-ka ugu lug yeeshay **dhaqdhaqaaq dhanka nacaybka ah**.
- ❑ Qofka dhibbanaha ayaa hore **loo dhibay ama loo geystay xadgudub dhanka afka ah** iyada oo ku saleysan in uu ka tirsan yahay koox la beegsaday.
- ❑ **La'aanta  ujeedooyin kale oo ka dambeeya** dhacdada.

# Talooyin loogu talagalay la macaamilka Booliska

## Soo sheegida

- Isticmaal erayada “dembi nacayb ah” (“hate crime”) ma aha eex
  - Dembiyada nacaybku waa mid si caalami ah loo fahmo
- Si gaar ah u sheeg sida aad u garanayso in lagu beegsaday
  - Soo sheeg hadalada cayda ah ee saxda ee aad maqashay
  - Sharrax sida luqaddu u beegsanayso aqoonsigaaga dhabta ama sida loo arko
  - Sharraxaad ka bixi tilmaamayaasha eex oo kasta
  - Sharrax goobta aad joogto ama taariikhda, haddii ay khuseyso
  - Sharraxaad ka bixi wixii dhar ah, astaamo, calaamado, ama sawirrada tattoos-ka ee aad aragtay ee la xiriira nacaybka
- La wadaag mid kasta iyo dhammaan faahfaahinta (dhawaaqyada, urta, tilmaamaha, iwm.)
  - Tani waxay ku xiri kartaa dembi kale, ama khuseyn kartaa caddeynta ujeedada ka dambeysa eexda
- Soo sheeg burburka hantiyeed ama qasaare oo wata cadadka lacageed/qiimaha
  - Aan qiime lahayn/dareen leh= $0
  - Qiimaha burburka/qasaaruhu ayaa go’aamiya waxa uu yahay dembiga la isku soo oogi karo

# Talooyin loogu talagalay la macaamilka Booliska

## Soo sheegida

- Soo sheeg xanuunka
  - Ha is adkayn
  - Xanuun la'aan/dhaawac wuxuu ka dhigan yahay in aanan la isku soo oogayn weerar sida ku cad sharciga Oregon
  - Heerka xanuunka, haddii xanuunku ahaa mid waaraya, haddii dhaawucu wax u geystay isticmaalkaaga/dhaqdhaqaaqaa ayaa go'aamiya waxa uu yahay dembiga la isku soo oogi karo
- Soo xigo xeerarka
  - Dhacdada Eexda, ORS 147.380
  - Dembiga Nacaybka ee Darajada Labaad, ORS 166.155
  - Dembiga Nacaybka ee Darajada Koowaad, ORS 166.165
  - Isku cabsi gelinta Muujinta Xariga Qoorta 'Noose', ORS 163.191
- Ma jirta miyaa gudbinta khadka telefoonka ee dhacdooyinka eexda? La wadaag aqoontaada, la xisaabtan
  - ORS 147.380(2) ayaa faraya booliska in ay dhibbanayaasha dhacdooyinka eexda u gudbiyaan Adeegyada Dhibbanaha ee Degaanka oo Loo qalmo ama Khadka Ka Jawaabida Eexda ee gobolka

# Ujeedada ka dambeysa Eexda Qayb ahaan

- Dembiyada eexda ee Oregon, **nacaybka ama eexdu waxay noqon kartaa *mid* ku biirinaysa in ujeedo ka dambeyso; ma AHA in ay noqoto ujeedada *kaliya* ee ka dambeysa** dembiilaha.
  - Tusaale ahaan, qof darawal ah wuxuu ka "xanaaqi" karaa baabuur wadistaada, si ula kac ah wax ugu dhufan karaa baabuurka, ka dibna ku caayi karaa, tanina waxay noqon kartaa dembi eex.

**State v. Hendrix**, 107 Or. App. 734 (Or. Ct. App. 1991), waxaa xaqiijisay Maxkamadda Sare ee Oregon ee 314 Or. 170 (1992)

"Eedaysanaha, iyada oo aan la soo xiganayn wax maamul ah, wuxuu sidoo kale ku doodayaa in gobolku uu sidoo kale ay tahay in uu ansixiyo in hal qof ama ka badan dhiirigeliyaan in ay ficil u sameeyaan *si gaar ah* ama *inta badan* iyada oo sababtu tahay sida ay u arkaan jinsiyada, midabka, diinta, dalka uu ka soo jeedo ama dookha galmo ee qofka dhibbanaha ah. Kuma raacsanin...Ma jiro wax ka mid ah sii socoshada luqadda ee ay doorteen sharci-dejintu oo qiyaasaysa boqolkiiba dhiirigelinta sharci-darrada ah ee lagama maarmaanka u ah in uu ka dhignaado dembi ah cabsi gelin. Dhammaan ujeedada laga leeyahay, Sharciga Cabsi gelintu wuxuu abuurayaa mas'uuliyada dembiga marka ujeedo wax ka dambeysa oo sharci darro ah ay wax door ah ka ciyaarto fal mamnuuc ah."

# Talooyin loogu talagalay la macaamilka Booliska

## Soo sheegida

- Ka codso sargaalka booliska ah in uu qoro warbixin
- Qaado qoraalo ku saabsan inta lagu jiro ama isla markiiba ka dib
    - Muxuu ahaa magaca buuxa ee sarkaalka ku soo jawaabay?  Kaarka aqoonsiga 'badge' #?
    - Waa maxay hay'ada booliska ee soo jawaabtay?
    - Codso kaarka ganacsiga ee sarkaalka
    - Codso kiiska # iyo CAD #
    - Ogow waqtiga aad soo sheegtay
    - Weydii markhaatiyaasha magacyadooda iyo macluumaadka lagala soo xiriirayo
    - Qor taarikada baabuurka ee markhaatiyaasha

# Talooyin loogu talagalay la macaamilka Booliska

## La sii socoshada

- Weydii waxa dhici doona ee xiga, iyo goorta
- Weydii sida loola xiriiro sarkaalka, xeer ilaaliyaha, ama qof u dooda qofka dhibbanaha ah
- Waxaad u xilsaari kartaa qof kale in uu noqdo barta xiriirka muhiimka ah oo loogu talagalay sii dabagalka booliska
  - Haddii ay su'aalo caddeyn ah kuu hayaan, waxaa dhici karta in ay weli kula hadlaan
- Weydii waxa la sameynayo haddii ay jiraan dembiyo dheeraad ah ama dhacdooyin dhaca
- Qaado qoraalo ku saabsan la wax la macaamil kasta oo soo raaca

Ma rabtaa inaad ogaato waxa ay damacsan tahay Qaybta Xuquuqda Madaniga ah?   Nagala soco warbaahinta bulshada!

Oregon Department of Justice's
CIVIL RIGHTS UNIT